



Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga

Conciliation Court

Waa maxay maxkamadaha madaniga ah ?

Maxkamadaha Madaniga waxaa mararka qaarkood lagu magacaabaa “Maxkamadaha Dadweynaha” ama “Maxkamadaha Dacwadaha Lacagta Yar.” Waa dacwadaha lacagta la isku heyso ay tahay ugu badnaan \$20,000. Haddii ay dacwaddu tahay mid deyn maqan lagu soo ururinayo ugu badnaan \$4,000. Uma baahnid in aad qareen qabsato. Degmo kasta waxa ay leedahay Maxkamadaha Madaniga.

Dacwadahee lagu dhageystaa Maxkamadda Madaniga?

Waxa aad ka codsan kartaa lacag aad cid ku leedahay inuu lagu xukumo ama in lagu soo celiyo hanti aad adigu leedahay.

Waxaa tusaale inoo noqon kara:

- Waxa aad iibsatay gaari duug ah, iibiyaha ayaa been kaaga sheegay xaaladda gaariga.
- Qof ayaa u shaqeysay oo lacagtii kuu diiday.
- Qof guri kula kireystay oo aad lacag ku leedahay ama alaab ayuu kaa heystaa.
- Qof ayaa kuu sheeganaya alaab uu kuu heysto (qiimuhu waa inuu ka yaraadaa \$20,000).
- Deriskaaga ayaa dhibaato u geystay hantidaada.
- Kireeyaha oo aan kuu soo celin lacagta keydka ee kirada (security deposit).
Akhri xogta urursan ee, [Lacagta Keydka Ee Kirada](#).

Kiisaska ayaan aadi karin Maxkamadda Dhexdhexaadinta?

Waxaa jira noocyo kiisaska ka mid ah oo aadan hor keeni karin maxkamadda dhexdhexaadinta. Haddii aad leedahay kiisas noocyadda ah, waa inaad aado maxkamadda degmadda, xataa haddii aad codsanayso xoolo ka yar \$20,000.



Kuwani waa qaar tusaalayaal ah:

- Kama aad ka codsan kartid xukumid xaq-siin xanuun iyo rafaad ah ama waxyeelo qalbiga ah
- Kama sheegan kartid qaan ah daryeel caafimaad khalad loo sameeyey ah
- Kama dacaweyn kartid cid hayb sooc adiga kugu sameysay
- Kama dacaweyn kartid cid sharaf-ridid, qadaf, ama been abruurid kugu samaysay
- Ma hor keeni kartid maxkamadan kiisas ku saabsan subarloogooyinka hantidda ma guurtadda ah ama khilaafaadyo ku saabsan xadadka dhulka

- Kuma waydiisan kartid ‘waxqabad cayiman.’ Taa macnaheedu waa kuma aad waydiisan kartid maxkamaddu inay amarto cid inay u samayso wax sidda ay ku balanqaadeen qandaraas, sidda bixinta adeeg.

Waxaa jira noocyo kale oo kiisas ah oo aadan hor keeni karin maxkamadda dhexdhexaadinta. Haddii aadan hubin in kiiskaagu uu ku haboon yahay maxkamadda dhexdhexaadinta iyo in kale, la tasho qareen.

Ma waxa aan ka dacweyn karaa Maxkamaddaha Madaniga?

- Marka ugu horeysa isku day in aad qofka la gaarto wax heshiis ah . Waraaq u qor aad ku cadeyneyso waxa aad sheeganeyso iyo sababta. Taariikhda ku qor. Nuqul (koobi) ka reebo. Waxa aad ugu sheegi kartaa in aad maxkamadda ka dacwooneyso u qabo muddo 2 todobaad ah inuu kaaga soo jawaabo Ha muujin caro hana isticmaalin erayo xunxun - dhabta ka hadal. Waa in aad xusuusnaataa in waxyaabaha aad warqadda ku qorto uu qaaligu akhrin doono.

- Ka fikir “dhexdhexaadin.” Dhexdhexaadinta waa hab lagu xaliyo khilaafka maxkamadda ka hor. Dhexdhexaadiyayaasha waa dad loo tababaray in ay dhageystaan xaqiiqada waxyaabaha la isku hayo oo isku soo dhaweeyaan dhinacyada is haya. Waxa ay ka caawiyaan in heshiis la gaaro iyada oo qof walba waxa uu doonayo ay u cadahay.



- Dhinaca kale waa inuu ogolaadaa dhexdhexaadinta. Warqadaada waxa aad ku weydiin kartaa haddii dhinaca kale ay doonayo dhexdhexaadin.

Si aad u ogaato barnaamijyada dhexdhexaadinta ee degaankiina:

Ka hubi Dhexdhexaadinta Bulshada ee Minnesota (Community Mediation Minnesota) ee <https://communitymediationmn.org>.

Waxa kale oo aad wici kartaa 2-1-1 ama fariin qoraal ah ugu soo diri kartaa nawaaxiga aad degan tahay 898-211 ama kala hadli kartaa barta internetka www.211unitedway.org/about-211/somali/.

Bogga internetka ee maxkamadda waxa aad ka heli kartaa macluumaadka iyo liiska dhexdhexaadiyayaasha: www.mncourts.gov/Help-Topics/AlternativeDisputeResolution.

- Haddii ay wax ka badan hal dacwad, la tasho qareen inta aadan dawacadda diiwaan gelin. Waxaa suurogal ah in aadan laba dacwadood furi karin dhawr shay oo isku mar dhacay.

Tusaaale ahaan – shil gaari ayaad gashay oo aad Maxkamadda Madaniga kaga dacwootay . Gaariga kaliya oo aad dacwadda ku koobto, waxa suurogal in aad lumiso dacwad kale oo aad dhaawaca kaa soo gaaray shilka kaga dacwoon laheyd.

Sidee ayaan dacwad u diiwaan gelin karaa?

Waxaa jira 2 siyaabood oo lagu diiwaan geliyo dacwad.

1. **There Waxaa jira Habraac iyo Barnaamij Diiwaan gelin oo cusub ([Guide and File program](#))** oo uu kuu ogolaada inaad sameysato aadna diiwaangeliso foomamka aad ugu baahan tahay maxkamadda madaniga ah. Gal shabakada www.mncourts.gov, riixna Hel Foomamka ('Get Forms,') riix Maxkamadda Madaniga/Qaamaha Yaryar ('Conciliation / Small Claims Court.'). Wax walba oo aad u baahan tahay inaad ogaato waa qayb ka mid ah barnaamijkan.

AMA

2. **La soo bax (download) foomamka ka dibna adigu kaligaa xareyso**


Dacwadaada ka diiwaangeli Maxkamadaha Madaniga ee degmada uu degan yahay qofka aad dacweeneyso. Haddii ay tahay goob ganacsi, ka diiwaan geli dacwada degmada ay xafiis ku leeyihiin.



Haddii aad kireeyaha ku dacweyneeyso keydka kirada, dhibaato la xiriirta xagga dayactirka, ama kirada guri degaan ka bax ah, waxa aad dacwadaada ka diiwaan gelin kartaa degmada uu gurigu ku yaalo **ama** halka uu degan yahay kireeyaha.

- Maxkamadda ayaad ka heleysaa foomamka aad u baahan tahay. Waxaa lagu magacaabaa "Plaintiff's Statement of Claim" (Warbixinta Qaansheegashada)."

Waxa aad sidoo kale [ka heli kartaa barta internetka](#). Soo booqo www.mncourts.gov.



- Guji "Forms & Instructions" ee jadwalka.
- Guji "Conciliation/Small Claims Court" (*Maxkamadda Dacwadaha Madaniga*)
- Guji "Plaintiff's Statement of Claim" (*Warbixinta Qaansheegashada*)

Haddii aad dooneyso tilmaamaha buuxinta foomka, ama aad u baahan tahay "Affidavit of Service (Foomka Cadeynta Gaarsiinta)", Guji Diiwaangelinta "Qaansheegashada Maxkamadda Madaniga ah (Filing a Conciliation Court Claim)" ee xirmada ku qoran liiska.

- Buuxi "Statement of Claim and Summons (Warbixinta Qaansheegashada)." Waxa aad u baahan tahay magaca buuxa ee qofka ama shirkadda aad dacawaynayso iyo ciwaankooda. Si aad u ogaato magaca sharciga ah ee ganacsi, kala xiriir Xoghayaha Gobolka (Secretary of State) khadka ah (651) 296-2803, ama barta www.sos.state.mn.us.


Waxa kale aad macluamadka qoraal ahaan ugu weydiisan kartaa:

Secretary of State
60 Empire Drive, Suite 100
St. Paul, MN 55103

Kolka aad xaraynayso foomamka waxaa jira khidmad lagu xareeyo. Khidmadda xareyntu ugu yaraan waa \$65. Degmooyinka qaarkood waxa ay qaadaan intaa ka badan. [Waxa aad ka heli](#)

[kartaa khidmadda ay ee degmadaaddu qaado barta](#) ee <https://mncourts.gov/> iyadoo soo hoos gelaya Help Topics (Mowduucyadda Caawinta) – Court Fees (Khidmadda Maxkamadda) – District Court Fees (Khidmaddaha Maxkamadda Degmooyinka)

Haddii uu dakhligaagu yar yahay, waxaa dhici karta inaad bixin. Horay u soo qaado cadeyn muujineysa dakhligaaga. Xogheynta maxkamadda weydiiso Foomka Ka Cafinta Lacagta. Waxaa kale oo aad [foomkan](#) aad ka heli kartaa bogga internetka ee maxkamadda: <http://www.lawhelpmn.org/forms>. (ingiriisi kaliya)



- Guji “Help Topics”
- Guji “Conciliation Court (Small Claims Court)”
- Guji “Forms” tab
- Guji “Fee Waiver Form - Affidavit of Inability to Pay Conciliation Court Filing Fee”

U Geynta Warqadaha Dacwada Eedayane Walba

Kolka la xareeyo foomamkaaga, maamulka maxkamadda ayaa kuu soo diri Wicitaan iyo taariikhda dacwadda la qaadayo boostadda. Eedayane kasta waa in warqadaha loo geeyaa Wicitaanka iyo nuqul ah Oraahda Qaansheegadka ah. Tani waa si ay u ogaadaan sababta aad u dacawaynayso iyo marka maxkamadda la tagayo.

Sidda warqadaha loogu gaynayo eedayane walba waxa ay ku xiran tahay cadadka qaansheegadka ah iyo meesha ay joogaan.

Haddii qaantaadu ay tahay \$2500 wax ka yar, eedayasanahana ciwaankiisu uu yahay Minnesota, IYO

- **Haddii eedayanaha ciwaankiisu uu yahay degmadda aad dacwadda ka xareysanayso**, kolka maamulka maxkamadda ayaa waqadaha u geeya eedayane walba iyadoo boostadda degdega ah ugu diraysa.
- **Haddii ciwaanka eedayanahu UUSAN ahayn degmadda aad dacwada ka xareyso** laakiin wali uu yahay Minnesota, maamulka maxkamaddu waxaa DHICI karta inuu boostadda degdeg ah ugu diro eedayane walba. Tani waxa ay ku xiran tahay nooca kiisku uu yahay. Haddii maamulka maxkamaddu uu warqadaha dacwadda u geyn eedayanayaasha kiiskaaga, kolka waa khasab inaad adigu ugu geeyso eedayane walba warqadaha boostadda sugan.

Ka dibna aad maamulka maxkamadda uga xareyso cadeyn ah in warqadahii loo geeyey 60 cisho gudahood laga bilaabo kolka maxkamaddu ay soo saartay amarka Wicitaanka ah.

Si aad u cadeyso in warqadihii la geeyey, xaree Foomka Dhaarta ee Maxkamadda Dhexdhexaadinta ee Warqado Geynta ([Conciliation Court Affidavit of Service form](#)) ka dib kolka eedayane walba loo geeyo warqadaha. U samee Foom Dhaarta Maxkamadda Dhexdhexaadinta ah oo u gooni ah eedayane walba.

Haddii aadan hubin sidda warqadaha loogu geeyo eedayane, waxaa u baahan kartaa inaad hesho talo dhanka sharciga ah.

Haddii qaantaadu ay ka badan tahay \$2,500, ciwaanka eedaysanahuna uu yahay Minnesota

Haddii cadadka qaansheegadkaagu uu ka badan \$2500, kolkaa waa khasab in aad warqadaha ugu geeyso eedaysane walba boostadda sugan. Ka dibna aad ugu xareyso cadeyn ah in warqadihii loo geeyey maamulka maxkamadda 60 cisho gudahood laga bilaabo kolka maxkamaddu ay soo saartay amarka Wicitaanka ah.

Si aad u cadeyso warqadihii in la geeyey, xaree Foomka Dhaarta ee Maxkamadda Dhexdhexaadinta ee Warqado Geynta ([Conciliation Court Affidavit of Service form](#)) ka dib kolka eedaysane walba loo geeyo warqadaha. U samee Foom Dhaarta Maxkamadda Dhexdhexaadinta ah oo u gooni ah eedaysane walba.

Hadii aadan hubin sidda warqadaha loogu geeyo eedaysane, waxaa u baahan kartaa inaad hesho talo dhanka sharciga ah.

Haddii ciwaanka eedaysanahu uusan ahayn Minnesota

Kolkaa amarka Wicitaanka ah inta badan waa khasab in gacanta looga dhiibo eedaysanaha isagoo xaadir ah. Waxaa laga yaabaa inaad waydiisato shariif ama qof warqadaha maxkamadda dadka u geeya inuu amarka Wicitaanka ah u geeyo eedaysanaha. Xataa haddii qaantu ay tahay \$2500 ama ay ka yar tahay. Si aad u cadeyso in warqadaha maxkamada dadka kale loo geeyey, waxa aad u baahan tahay inaad u xareyso Foomka Dhaarta ee Maxkamadda Dhexdhexaadinta ee Warqado Geynta ([Conciliation Court Affidavit of Service form](#)) oo u gooni ah eedaysane walba oo warqadaha loo geeyey.

Waxaa jira noocyo ka mid ah eedaysanayaasha oo leh xeerar u gaar ah oo warqado geynta ah sidda shirkadaha caysmiska ee ka hawlgala dibadda gobolka iyo noocyo ka mid ah shirkadaha waaweyn. Haddii aadan hubin sidda eedaysane waqrad maxkamadeed loogu geeyo, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad hesh talo dhanka sharciga ah.

Waa maxay cabasho liddi ku ah dacwadeyda?

Qofka aad dacweyso (eedaysanaha waxa uu diiwaangelin karaa dacwad liddi ku ah taada oo uu sheeganayo in **iyaga** lacag kugu leeyihiin. Maxkamaddu way dhageysaneysaa cabashada liddiga kugu ah marka ay dhageysaneyso dacwadaada.



Waa maxay heshiis?

Qaar badan oo ka mid ah dacwadaha waxa ay ku dhamaadaan heshiis inta aan maxkamadda la gaarin. Waxa kale oo aad heshiis gaari kartaa wax ka yar ka hor dhageysiga maxkamadda. Ka fikir heshiis aad meel dhexe isugu timaadaan oo aad u soo jeediso dhinaca kale. Xitaa haddii aad ku guuleysato maxkamadda, waxaa laga yaabaa in ay kugu adkaato helitaanka lacagta Sidaa darteed, heshiis markiiba lacag lagu siinayo waa wax wanaagsan.

Heshiis kasta oo aad gaartaan waa inuu noqdaa mid qoraal ah! Labada dhinac waa in ay saxiixaan oo taariikhda ku qoraan. **Heshiiska maxkamadda keen maalinta dhageysiga**, oo maxkamaddu

haka dhigto amar ka soo baxay. Tani waxa ay kaa caawineysaa in ay xaqaaga ilaaliso haddii hadhow khilaaf soo baxo.

Sidee ayaan isugu diyaarin karaa maxkamadda?

- Qor wax kasta oo aad dooneyso in aad maxkamadda ka sheegto.
- La hadal markhaatiyaasha oo weydiiso in ay yimaadaan dhageysiga. Markhaatiyaasha oo maxkamadda yimaada ayaa ka wanaagsan qoraal ay maxkamadda u soo qoraan. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa in qaaligu aanu tixgelin qoraal ay markhaatiyaashu soo qoraan. Haddii aanu qof muhim dooneyn inuu maxkamadda yimaado, weydiiso xogheynta "Maxkamad uga yeerid subpoena." Maxkamad uga yeerid waa amar markhaatiga lagu farayo inuu maxkamadda yimaado ama keeno cadeynta.
- Haddii uu eedeysanaha hayo warqado ama cadeyn aanay ku siin, weydiiso xogheynta in ay u diro maxkamad uga yeeris.
- Saaxiibadaa u sharax waxyaabaha dacwadaada ku dhici kara haddii aanay maxkamadda imaan.
- Keen maxkamadda cadeymaha oo dhan sida sawirada, warqadaha, lacag qabashada iyo heshiiska kirada. Adiga ayaa lagaa doonayaa in aad cadeyso dacwadaada oo aad soo bandhigto cadeynta la xiriirta tirada lacagta. Waa fakar fiican inaad soo qaadata 3 nuqul (copies) oo ah mid walba oo daliilaha ah. 1 adigu aad haysto, 1 aad siiso eedaysanaha, 1 aad siiso Maxkamadda.
- Tag maxkamadda oo daawo dhageysi socda ka hor balantaada oo arag sida maxkamaddu u qaado dhageysiga.
- Inta uu socod dhageysiga, waa in aad **ixтираамтаа** qaaliga iyo eedeysanaha. **Haka dhex gelin hadalka** marka ay dadka kale hadlayaan. Haka xanaaqin waxyaabaha uu eedeysanaha sheego. **Dacwadaadu waxa ay ku xiran tahay sida aad u dhaqanto.**



Goorma ayaan ogaanayaa go'aanka maxkamadda?


Maxkamaddu inta badan go'aan ma gaarto xilliga dhageysiga. Waxaa laga yaabaa in ay idin caawiyaan in aad adiga iyo eedeysanaha heshiis gaartaan dhageysiga. Haddaaii aanay gaarin, maxkamaddu xilli dambe ayey go'aanka gaartaa oo boostada ugu dirtaa dhinacyada kala duwan

Go'aanka maxkamadda ma aha dhaqangal ilaa ay 20 maalmood ka soo wareegto maalinta go'aanka la soo diray. Maamulaha maxkamadda ayaa kugu sheegaya taariikhda ogeysiiska lagu soo diro. Mudada 20 maalmood ah waxaa lagu magaaca "mudada sugitaanka (stay period)." Waxa ay labada dhinacba siineysaa muddo ay racfaan kaga qaataan.

Sidee ayaan ku helayaa lacagta la ii xukumay?

Maxkamadaha Madaniga KUUMA SOO uruerimeyso lacagta lagu xukumay. Waa aad ku guulaysan kartaa kiiskaaga maxkamadda dhexdhexaadinta, laakiin taa macnaheedu ma aha in markiiba dhinaca kale inuu ku siinayo lacagta. Haddii aysan ku siin lacagta ama aysan heshiis kula gelin adiga ku saabsan sidda ay u bixinayaan lacagta, waxaa jira waxyaabo aad sameyn karto si aad isugu daydo si aad u hesho lacagta. Waxa ay u baahan tahay dulqaad! Xusuusnoow, waa in aad sugtaa muddo 20 cisho ah marka go'aanka lagu soo diro inta aadan wax talaabo ah oo aad lacagtaada ku heleyso.


Waxaa jira dhawr talaabo oo aad qaadi karto si aad [lacagta ku hesho](#). Si aad wax uga ogaato talaabooyinkaas, soo booqo: www.mncourts.gov.



- Guji “Help Topics” (*Mowduucyada Caawinaadda*)
- Guji “Conciliation Court (Small Claims Court)” (*Maxkamadda Madaniga (Maxkamadda Dacwadaha Madaniga)*)
- Guji “FAQs” (*Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo*)
- Hoos u raac, ka dibna guji “How do I collect money after winning a judgment?” (*Sidee lagu helaa lacagta maxkamaddu kuu xukuntay?*)

Haddii la iga adkaado ama aanan ku qancin go'aanka maxkamadda, maka qaadan karaa racfaan?

Haa. Go'aanka Maxkamadaha Madaniga waxaa racfaan looga qaadan karaa maxkamadda degmada ee isla degmada. Waa in aad ka diiwaangelisaa Maxkamadda Degmada. Waxa aad ka heli kartaa [Foomamka iyo tilmaamaha](#) barta internetka ee: www.mncourts.gov.



- Guji “Forms & Instructions” (*La Soo Bax Foomamka*)
- Guji “Conciliation Court (Small Claims Court)” (*Maxkamadda Madaniga (Maxkamadda Dacwadaha Madaniga)*)
- Guji “Appeals” (Racfaanka)

Ogeysiiska racfaan ka qaadashada waa in aad ka diiwaangelisaa maamulka maxkamadda oo aad gaarsiisaa dhinaca kale labaatn (20) cisho gudahood taariikhda maxkaamddu kuu soo dirtay ama ku soo gaaray amarka maxkamadaha madaniga. Haddii aadan diiwaangelin racfaanka mudada lagu qabtay waa la biibi'inayaa.

Haddii aadan ku guuleysan maxkamadda degmada, waa in aad bixisaa \$50 si aad u bixiso kharashka dhinaca kale. Haddii aad ku guuleysato, waa in ay bixiyaan \$50 oo kharashka dacwadda ah.

Macluumaad dheeraad ee Madaniga waxa aad ka heleysaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Gobolka ee <https://www.ag.state.mn.us/Consumer/Handbooks/ConCourt/Default.asp>

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.